# Mandatory Reporting & Child Abuse Prevention (Ka Warbixiyaha Waajibka ah Iyo Kahortaga Tacadiga Ilmaha)

Qoysasku waxay leeyihiin qaabab iyo cabiro badan oo waxaa dhici karta inayna wada buuxin waxa looga fadhiyo. Maadaama oo qoysku aanu ahayn nooca qoyska aad taqaanay kama dhigna in lagaaga baahan yahay inaad ka warbixiso. Badanaa, waxay badanaa u baahan yihiin taagero halkii wax laga qaban lahaa.

## Waxyaabaha La Eegayo.

- Miyaad xog wanaagsan ka hayaa xaaladaha ay tahay in la fahmo ee khataraha qoyska iyo xaaladaha ilaalinta?
- Waa maxay fahankayga taariikhda dhaqanka garka ah ee waalidka?
- Sidee ayay khibrayda shakhsi ahaaneed u saamaynaysaa fahankayga iyo qiimaynta waalidka?
- Miyaa taariikhda hore ee waalidku saamaysaa go'aankayga iyada oo ay jiraan cadaymo is bedel?

## Maxaan Lagu Cadaynin Warbiixnta, Laakiin U Baahan Kara Taageero?

- **Dhibaada dhaqaale ee qoyska:** Sheeg macluumaadka ku saabsan oo ku dhiiri geli inay doontaan barnaamijyada kaalmada dhaqaale.
- **Isku buuqa waalidka:** Fasalada waalidnimo ee lagu taliyo ama khayraadka la talinta.
- **Dhaawacyo yaryar oo shilalka ah:** La socod caafimaad oo lagu taliyay hadii loo baahdo.
- **Mushkilada habdhaqan:** Waxaa lagala xidhiidhaa lataliyaha dugsiga ama dhakhtarka cilmi nafsiga wixii tilmaamo ah.

## Yaa Ah Ka Warbixiyaha Waajibka ah?

Ka warbixiyayaasha waajibka ahi waxaa weeye xirfadlayaal iyo dad wakhtigooda ku deeqay oo la shaqeeya caruurta, dhalinyarta iyo qoysaska.

**Kooxaha muhiimka ah waxaa kamid ah:**

- **Shaqaalaha Dugsiga**
- **Xirfadlaha Daryeelka Caafimaadka** (dhakhtarka ilmaha, kaaliyayaasha caafimaadka, shaybaadhayaasha caafimaadka, farmasiiyada, iyo xirfadlayaasha caafimaad, imw.)
- **Shaqaalaha Bulshada** (shaqaalaha iyo dadka wakhtigooda ku deeqay ee ka (Department of Children, Youth, and Families (socda Waaxda Caruurta, Dhalinyarta iyo Qoysaska , DCYF)/Department of Social and Health Services (Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka , DSHS)), U Adeegayaasha iyo xarumaha HOPE)
- **Ciidanka Nabadgalyada** (Shaqaalaha waaxda kormeerka xabsiga kadib ee caruurta iyo Department of Correct (Waaxda Jeelashada, DOC))
- **Bixiyayaasha Daryeelka Caafimaadka**

Inkasta oo liiskan uu sheegaya inta sharciyan ay ku waajib tahay inay ka warbixiyaan, uma diidayo shakhsiyaadka doonaya inay ka warbixiyaan iyo inay buuxiyaan kaalmaha kale ee daryeelida. Wax badan ka oggow cida ay ku waajib tahay inuu ka warbixiyo tacadiga ilmaha iyo dayacaada adiga oo iskaan garanaya QR koodhka xaga hoose ee boga.

Hadii aad dhago la' dahay, dhago culus tahay, ama laxaad la'aan hadalka ah qabto oo aad doonayso inaad ka warbixiso dayacaad iyo tacadi ilme oo aad ka shakiday, waxa aad isticmaali kartaa Adeega Gudbinta (sida 711 ama 1-800-833-6384) si aad ula xidhiidho laynka qaadashada Gobolka oo dhan ee 866-363-4276.

## Yay Khasab Ku Tahay Inuu Ka Warbixiyo?

- Tacadiga jidhka
- Tacadiga galmada
- Ka faaïdaysiga galmo
- Si dayacaad ama xun ula dhaqan
- Dayac

*Sharaxa buuxa waxaa laga heli karaa RCW 26.44.*

## Sida Looga Warbixinayo

1. **Aqoonsiga:** Aqoonsiga calaamadaha tacadiga ama dayacaada.
2. **Duwaanka:** Qoraalka faahfaahinta ee la xidhiidha (taariikhda, wakhtiga, kormerka).
3. **Warbixinta:** La xidhiidh maamulka ay khudayso markaba.

## Macluumaadka Xiriirka

La hadal **866-363-4276** ama waxa aad heshaa lambarka qaadashada deegaankaaga adiga oo iskaan garanaya QR koodhka hoose si aad u hesho macluumaadka xafiiska.

## Waajibaadka Sharciga ah

Hadii laga warbixin waayo waxay keeni kartaa raad sharci.

## Raadka In Warbixinta Been Ah Lasoo Gudbiyo (warbixinta aad ogtahay inay been tahay)

- Talaabo sharci ah ayaa laga qaadi karaa shakhsiyaadka isaga oo og warbixinta beenta ah sameeya.
- Warbixinta beenta ah waxay jeedin kartaa khayraad loogu baahan yahay kiisaska runta ah oo waxay waxyeeli kartaa ruuxa aan waxba galabsan.
- Qofka si kas ah u sameeya warbixinta been abuurka ah ee la xiriirta xadgudub ama dayacaada wuxuu ku dhacayaa danbi uu ciqaab ku mutaysanaayo sida ku cad RCW 9A.20.021. **(https://app.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=9A.20.021)**

**Warbixinta tacadiga ilmaha waxay ku yeelan kartaa saamayn wayn oo mudo dheer ah qoysaska ay khusayso, waxay saamayn kartaa xidhiidhka, dabacsanaanta, iyo badqabka dareenka. Hadii ay macquul tahay, in mudnaan laga siiyo taageero ka warbixinta ayaa gacan ka gaysan karta yaraynta saamaynta mudada dheer ee qoyska iyada oo weli laga jawaabayo baahiyaha ilmaha.**

**KHAYRAADKA TAAGEERO:** Dhamaan qoysaska waxay la kulmaan wax ay ka warwaraan, oo ruux kasta waxa uu u baahan yahay taageero wakhti kamid ah wakhtiyada. Marka qoyska laga caawiyo inay ogaadaan adkaysigooda gudaha, waxa aad si wanaagsan u saamayn kartaa halka ay u socdaan oo waxaa u keeni kartaa isbedel mudo dheer ah.

**Dhaxalka Waalidka ee Caruurta Washington:** Waxay siisaa taageero iyo khayraad qoysaska. La hadal 1-800-932-4673 ama booqo **Parenttrust.org**

**I Kori Washington:** I Kori waxa weeye adeeg bilaash ah oo ku xidha waalidka iyo daryeelayaasha, khayraadka bulshadooda oo waxaa kamid ah fahanka korniinka ilmaha, kaalmada cuntada, caymiska bilaashka ah ama qiimaha jaban iyo sidoo kale khayraadka uurka iyo waalidnimada. Wax badan ka oggow **https://helpmegrowwa.org**

## Wixii Macluumaad Dheeraad ah:

Isticmaal QR Koodhka, ama qabo **www.dcyf.wa.gov/safety/report-abuse**

## Xaaladaha Badbaado

Daraasad ayaa lagu ogaaday shan xaaladood oo badbaado oo si wanaagsan uga hortagta tacadiga iyo dayacaada ilmaha. Qoysaska waxaa looga baahan yahay in baro kuwan si ay si dhaanta ugu yareeyaan warwarka oo ay u yareeyaan khataraha la xidhiiha. Wax badan ka oggow **https://dcyf.wa.gov/services/child-development-supports/sfwa**

| *Adkaysiga Waalidka:* | *Aqoonta Waalidnimada iyo Korniinka Ilmaha/Dhalinyarta:* | *Isku Xidhka Bulsho:* | *Taageero la Taaban karo:* | *Hormarka Bulsho iyo Dareen:* |
|---|---|---|---|---|
| *Waxa aan ka gudbi karaa wakhtiga adag* | *Waan garanayaa meesha aan ka heleyo xirfadaha waalidnimoada iyo korniinka hormarka ilmahayga.* | *Waxa aan garanayaa dad i garanaya oo i taageeraya.* | *Waan garanayaa meesha aan u doonanayo kaalmo.* | *Waan garanayaa sida aan uga caawinayo caruurtayda inay ka hadlaan dareenkooda.* |

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

*DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, xaalada dhalashada ama soo geleytiga, da'da, rabitaanka jinsiga ama aqoonsiga jinsiga, xaalada ciidan ama ciidanka hawlgabay, xaalada hooyada naas nuujinaysa, iyo jiritaanka wax laxaad la'aan jidh, dareen ama maskaxeed ama isticmaalka ayda ruuxa haya ama xayawaanka carbisan ee ruuxa haga. Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka **communications@dcyf.wa.gov**.*

DCYF PUBLICATION CWP_0040 SM (03-2025) Somali